

UJEEDDO:- CADDAYN XOG OGAAL DARDAARAN & LA WAREEGID LACAG.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **28/01/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, waxaa nootaayada horteeda yimid Suldaan Mohamud Abdullahi Mohamed Asagoo raali ah Cid ku qasabtay Cadeyntaan bixinteedana aysan Jirin Wuxuuna Nootaayada Ka Hor Cadeeyey Sidatan Soo Socota:-

Aniga oo ah **Suldaan Mohamud Abdullahi Mohamed** Somali ah Sita Somali Passport No.P0101844, Kana Mid ah Dhaxaltooyada Marxuum Abdullahi Haji Mohamed, Ahna Suldaanka reerka iyo ninka ugu wayn reerka ee hadda jooga, Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka Fiyoow Taam ah, Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan xog ogaal ka ahay kana maqlay Walaalkeey **KULMIA ABDULLAHI MOHAMED** in uu goob jog ka ahaay shir uu aabaheen Marxuum **Cabdullaahi Xaaji Maxamed** ku qabtay Gobolka Bari, Gaar ahaan degmada **Rako Raaxo**, qiyaastii sanad ka hor, Shirku waxa uu ku saabsanaa dacwad ka timid Walaalkey **Muuse Abdullahi Mohamed** oo dacweeyay **Bashir Abdullahi Mohamed** oo isna nala dhashay, dacwadaas oo aheyd mid Labadooda Ka Dhaxeysay khuseysayna Arrimo gaar ah, Markii dacwadaas iyo khilaafkaas lagaba gabeeyay, ayuu **Muuse C/llaahi Xaaji maxamed** iyo intii joogtay goobtaas oo ah **Ilma Cabdullahi Xaaji Maxamed** ay Aabe weydiiyeen in ay jirto Wax Xoolo iyo Xuquuq uu Adeerkeen **Ismail Haji Mohamed (Siibed)** uu u haayo Aabo **Abdullahi Haji Mohamed**, Wuxuuna Aabe Ka Hor Cadeeyay reerka oo idil Hortooda Yirina sidatan “haddii aan Caawa dhinto Ma jirto xoolo aan ku leeyahay Ismail Haji Mohamed (Siibed). **Page 1/3**



Sidoo kale cid wax ku lehna oo Reer C/llaahi Xaaji Maxamed aysan jirin, Hadii uu adeerkiin Ismail Haji Mohamed (Siibed) Wax hanti ah uu idiin keeno ka qaata”.

Walaalkeey kulmiye Abdullahi Mohamed wuxuu ii raacshay iina sheegay intii goobtaas ay fadhiyeen in aabo ku dardaarmay arrimo dhowr ah kana mid yihiin:-

1. In ilma **Abdullahi Haji Mohamed** aysan ilma **Ismail Haji Mohamed (Siibed)** ku laheyn wax hanti ah oo aabo ka tegay mood iyo nool.
2. in Ilma **Abdullahi haji Mohamed** ay dhaxladeen hanti ay ka mid aheed gaarigii Sabaaxa ahaa taargadiisu ahayd 60172I, baabuurki N3 oo buluugga ahaa iyo ari aan ka soo saaray xerada hooyaday Faaduma Faarax.

Hadaba waxaan halkaan ka qirayaa In aysan jirin wax hanti iyo xoolo aan ku leenahay ama noogu haray Ilma Ismail haji Mohamed(Siibad) sida waafaqsan dardaarankii Aabaheyn Marxuum Abdullahi Haji Mohamed.

sidaas darted waxaan halkaan ka cadeeynayaa in aysan jiri doonin wax xaquuq ah ama hanti ah oo aniga dhankeyga ku sheegan doono Reer Ismail Haji Mohamed (Siibad).

Fiiro Gaar ah:- Anigoo ah **Suldaan Mohamud Abdullahi Mohamed** waxaan halkaan ka cadeeynayaa in Reer **Ismail Haji Mohamed (Siibed)** aan siiyay Akoon aan ku leeyahay Shirkadda Amal Carmo, Magaca: **Suldan Mohamud Abdullahi Mohamed, Account No.0911-04-68827-01** si ay ugu shubaan Lacag Dhan **US\$. 800,000** ay walaalaheen inoo keeneen, iyagoo fulinayaa dardaarankii Aderkood Marxuum Cabdullahi Xaaji Maxamed, sidaasna aan ugu guddoomay **0911029** ilmo Reer Cabdullahi Xaaji Maxamed.





SAXIIXA CADEEYAHA

1- MOHAMUD ABDULLAHI MOHAMED

Mohamed



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-ISMAIL WARIO MOLLU

2- ABDINOOR HASSAN

ISMAIL

Abdinoor

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1372/T.P.N/25, Tr. 28/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- MOHAMUD ABDULLAHI MOHAMED Ahna (Cadeeye) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Cadeeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By:C/qani



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 20/10/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamuud C/laahi Maxamed** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **D Dukumiintiga Original** Caddeynta **Rep No. 1372/T.P.N/25, Tr. 28/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Maxamuud C/laahi Maxamed
Taariikhda Caddeynta	28/01/2025

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Maxamuud C/laahi Maxamed** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay
FG:- Cadeyntaan Waxaa Loo Celiyay Origalkiisa Xafiiska Nairobi



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamuud C/laahi Maxamed

Maxamed C/laahi Maxamed